Soomaalida iyo arrimaha la xariira isbitaalada gobolka Frederiksborg

Buugaan yar waxaa loogu tala galay qaxootiga iyo ajaanibka degan gobolka Frederiksborg, sidii ay si sahalan ugu fahmi lahaayeen habka isbitaaladu u shaqeeyaan, iyo sida loogu daaweyn lahaa, haddii ay jirraan.

Maxaad samayn lahayd hadii aad jirratid

Deenmaark, haddii aad jirratid, waxaa ku daaweyn kara dhakhtarkaaga gaarka ah, ama waxaa lagugu daaweyn karaa isbitaalada gobolka. Daaweyntu waa bilaash, maxaa yeelay waxaa kaba canshuurta qaranka.

Haddii aad xanuunsatid, waa in aad teleefoon u dirtid dhakhtarkaaga oo aad ballan u dhigatid. Waa in aad u sheegtid lambarkaaga dhalashada. Dhakhtarkaaga ayaa ku baaraya, si lagu ogaado waxa aad ka tabaneysid. Dhaktarkaaga ayaa daawo kuu qoraya, haddii loo baahdo. Daawada waxaa laga gataa farmashiyaha.

Haddii dhakhtarkaagu uu qiyaaso in loo baahan yahay in isbitaalka laguu diro, asaga/ayada ayaa la xariiraya isbitaalka. Isbitaalka waxaa kuu diri kara oo keliya dhakhtarkaaga ama dhakhtarka waardiyaha. Haddiise aad shil gashid, si toos ah ayaa dhakhtarka laguu geynayaa.

Markii ay isbitaalka soo gaarto fartiintii dhakhatarkaagu soo diray oo ahayd in isbitaalka lagugu daaweeyo, ayaa isbitaalku kuu soo dirayaa warqad ku saabsan in lagu baambaaniyo (daaweeyo) iyo in isbitaalka lagu seexinayo. Baaritaanka iyo qalitaanka qaarkiis waxaa la socda sugitaan dheer. Waxaadse xor u tahay in aad dalbatid isbitaalkii aad doorbidid in lagugu daaweeyo, haddii uu jiro mid ka sugitaan gaaban. Lataliyaasha bukaha ee isbitaalka ayaa kaa gargaari kara, waxii macluumaad ah ee ku saabsan xaaladda sugitaanka ee isbitaalada kale. Eeg telefoonada ku qeexan buuggaan galkiisa dambe.

Haddiise ay jirro si kadis ah kuula soo gudboonaato sida jirrada qabsinka (bendijiido), waxaa lagu dhigayaa isbitaalka isla markiiba.
Dhakhtarkaaga waxaad la xariiri kartaa 8da subaxnimo ilaa 4ta gelinka dambe. Waxii intaas ka danbeeya iyo sabtida iyo axaddaba waxaad la xariiri kartaa dhakhtarka waardiyaha oo teleefoonkaan leh: 4825 0041.

Dhaktargaaga ayaa ku baaraya, oo kaala hadlaya sida ugu fiican ee laguu daaweeyn lahaa

Haddii shil weyn aad gashid, sida haddii lug kaa jabto ama dhiig kaa joogsan waayo, waxaa ambalaanso kaaga wici kara teleefoonka gurmadka ee 112 eheladaada, si laguula ordo qaybta gaargaarka deg-dega ah ee isbitaalka. Haddii aan dhakhtarka lagu dhigin adiga ayaa xallinaya sidii aad gurigaaga ku tegi lahayd (gaadiidka).

Haddi aadan shil weyn gelin, waxaa isbitaalaka kuu diri kara oo keliya dhakhatarkaaga ama dhakhtarka waardiyaha



Haddiise aad shil weyn gashid, waxaa ku caawin kara reerkaaga, oo la xariiraya telefoonka gurmadka ee 112, si ay ugu yeeraan ambalaanso ku geysa qaybta gargaarka deg-degga ah ee isbitaalka.

Haddii adiga ama eheladaa loo baahdo in laga daaweeyo cudur-maskaxeed, waxaad la xariiri kartaan dhakhtarkiina, si la idiinla xiriiriyo isbitaalka cudur-maskaxeedka ee ku yaala nawaaxiga aad degan tahay ama isbitaalka qaybtiisa cudur-maskaxeedka.

Haddiise uu kula soo gudboonaado cudur-maskaxeed deg-degga ah, waxaad si toos ah ula xariiraysaan qaybta gargaarka deg-degga ah ee cudur-maskaxeedka ee isbitaalka Hillerød.

Had iyo jeer xasuuso in aad sheegtid lambarkaaga dhalashada, markii aad la xariireysid dhakhtarkaaga, dhakhtarka waardiyaha ama isbitaalka.

Maxaad xasuusaneysaa markii isbitaalka lagu dhigayo

Markii isbitaalka lagu dhigayo, waxaa lagama maarmaan ah in aad xilligii lagula ballamay timaadid. Taasu waxay faa'iido u tahay adiga iyo qorsheynta isbitaalkaba. Haddii aadan fulin ballankii laguu dhiigay, waxaa laga yaabaa in aanan lagu daaweeyn ama muddo dheer gadaal laguu dhigo.

Markii aad isbitaalka imaaneysid, waa in aad la timaadid warqadii isbitaalka lagugu dhigay, kaarka caafimaadka iyo daawada aad isticmaashid, haddii ay jirto. Waxaad kaloo aad horay u soo qaadanaysaa dhar aad ku beddelatid, kabaha guriga lagu joogo, alaabta xamaamka, waxaad akhrisato iyo waxii la mid ahba.

Isbitaalka waad la imaan kartaa telefoonka gacanta, hase yeeshee adiga ayaa xil kaa saaran yahay in uu uusan kaa dhumin. Shaqaalaha isbitaalka ayaa kula socodsiin doona haddii ay jirto qayb aan la oggoleyn in telefoonka gacanta lala galo. Sida caadiga ah waxaa isbitaalka yaalla telefoon la soo jiidan karo. Waxaad kaloo ogaaneysaa in aadan isbitaalka u soo qaadan karin wax qaali ah, sida dahab iyo waxii la mid ahba, maxaa yeelay, isbitaalku mas'uul kama aha haddii ay kaa dhumaan. Adiga ayaa mas'uul ka ah waxyaalaha noocaas oo kale ah.

Waxaa kuu furan in ehelkaa ku soo raaco, markii isbitaalka lagu dhigo, kulamase seexa-nayaan. Sida aqlabiyadda ah ruuxu asaga ayaa gaadiidka uu isbitaalka ku imaanayo iyo midka uu kaga baxayaba soo diyaarsanaya.

Gargaarka xagga luuqadda

Shaqaalaha isbitaalka ayaa qaymeynaya in loo baahan yahay qof turjuma iyo in kale.

Haddii ay timaado dhibaato la xariirta xagga afka, isbitaalka ayaa qaymaynaya in loo baahan yahay mutarjum iyo in kale. Qofka mutarjumka ahi waa ruux sir lagu aammini karo. Waxaa la idinka codsanayaa in iinaan idinku soo wadan mutarjum.

Waxaa kaloo kuu furan in aad la timaadid hal ama labo qof oo ehelkaa ah, si ayaguna kuula maqlaan cudurka ku haya, iyo sida la damacsan yahay in laguu daaweeyo. Waxaa kaloo kuu furan in aad shaqaalaha isbitaalka weydiisid arrimaha la xarriira tixgelinta dhaqanka iyo diinta. Haddii aad doorbidid, waxaad codsan kartaa in laguugu yeero wadaad diinta ka wacdiya. Arrintaas waxaad kala ballamaysaa shaqaalaha qaybta isbitaalka ee lagu dhigay.Haddii aad u baahatid meel aad ku tukatid, waxaad kala xariireysaa shaqaalaha isbitaalka si ay kuugu soo diyaariyaan meel aad keligaa ku tukatid.

Hawsha joogtada ah ee isbitaalka

Isbitaalka waxaa caado u ah, in uu aad u mashquulsan yahay, waxaanna ka hirgala firfircooni heer sare ah, taas oo ah hawsha joogtada ah ee isbitaalku la kulmo maalin walba.

Subax walba waxaa lagu kicinayaa saacad joogta ah, raashinkana waxaa la cunaa xilliyo joogta ah. Isbitaalku wuxuu tixgelinayaa raashinka lagu siinayo in uu waafaqsan yahay diintaada iyo dhaqankaaga, waxaanna halkaas laguugu deeqi karaa in aad raashin gurigaaga kala timaadid. Waxaad kala hadli kartaa arrintaas shaqaalaha qaybta lagu dhigay.

Waxaa had iyo jeer kuu furan in aad dhakhtar la hadashid. Dhakhtarada iyo shaqaalaha isbitaalkuba waa dad mas'uul ah oo sirta lagu qarsan karo. Waxaa adiga kuu furan in aad ogaatid waxa dhakhtarku ku qoray galkaaga jirrada.

Sharciga u dhigan isbitaalka

Isbitaalada gobolku ma lahan xilli ka dhexeeya ee bukaha la soo booqan karo. Waxaase caado u ah inta badan in ay eheladaa iyo saaxiibadaa ku soo siyaaran kara gelinka dambe. Weydii shaqaalaha qaybta lagu dhigay, saacadda dadka la soo siyaaran karo. Qaybta lagu dhigay waxaa yaalla telefoonka lacagta/qadaadiicda lagu rido, kaas oo la isticmaali kartid. Waxaa bukaha u furan in uu diro ama loo soo diro telefoon ama warqaddo.

Shaqaalaha isbitaalka la socodsii haddii aad socod gaaban ku aadeysid dukaanka/makhaayadda isbitaalka, maxaa yeelay, shaqaalahu waa in uu ogaado meeshaad aad jirtid, haddii lagu baarayo ama lagu daaweynayo.

Isbitaalka waxaa jira qayb aan sigaarka lagu cabbi karin iyo qaybo lagu cabbi karo, halkaasna waxaa ka muuqda calaamad muujineysa arrintaas ayada ah. Shaqaalaha isbitaalka kala xariir arrintaas haddii shaki kaa galo. Sharci gooni ah ayaa jira oo ku taxalluqa isbitaalada cudur-maskaxeedka.

Waxaa had iyo jeer kuu furan in aad wada hadal la yeelatid dhakhtar ama kalkaaliyaha caafimaadka

Shaqaalaha isbitaalaka

Shaqaalaha isbitaalka, shaqadoodu waa kala soocan tahay. Shaqaalahu wuxuu u kala qaybqaybsan yahay koox-koox. Isbitaalku wuxuu leeyahay qaybo kala duwan oo gaar ah.

Shaqaalaha isbitaalka 80% waa haween. Qofka jirran waxaa, sida caadiga ah, daaweeyn kara ama daryeeli kara qof haween ah ama mid nin ah, isbitaalku ma tixgelinayo in ruuxa ku daaweynaya uu yahay rag ama dumar.

Isbitaalku ma tixgelinayo in aad dhedig ama lab tahay. Waxaa ku daaweyn ama bambaanan kara rag ama dumar.

Dhakhtarka ayaa mas'uul ka ah daaweynta bukaha. Kalkaaliyah caafimaadka ayaa culays ka saaran yahay daryeelka bukaha. Gacan yaraha kalkaaliyaha caafimaadka ayaa xil ka saaran yahay in ay ka qayb qaataan waxii daryeel ah ee ka socda qaybta.



Waxaa had iyo jeer ka dhexeeya xiriir xoog leh shaqaalaha qaybaha kala duwan ee isbitaalka

Dhakhtarku wuxuu ka soo baxay jaamacad. Dhakhtarku wuxuu leeyahay tacliin qaadanaysa 6 sano. Lixdaas sano ka dib ayuu wuxuu sii qaataa tacliin dheeraad ah oo ku saabsan qabytu uu taqasusay.
Kalkaaliyaha caafimaadku wuxuu soo qaatay tacliin 3 sano ah. Wuxuuna gaar ahaan u soo bartay qaybtu uu mustaqbalka ka shaqayn doono. Gacan yaraha kalkaaliyaha caafimaadku wuxuu soo qaatay waxbarasho qaadatay 2 sano, halkaas oo si gaar ah culays loo saaro sida loo xanaaneeyo dadka, loona daryeelo.

Inta aad isbitaalka taallid waxaad la kulmaysaa shaaqale fara badan oo shaqooyin gaar ah qabta. Kuwaas waxaa ka mid ah kuwa shaqada ku leh jir-dhisidda, dib u tababaridda ruuxa shil galay, daliigidda/duugidda jirka, iyo kuwa jikada, nadaafada iyo rarrida dadka jirran dhaqada ku leh. Dadka ugu horeeya ee aad isbitaalka kula kulmaysaa waxaa weeye xoghaynta.

Shaqa maalmeedka isbitaalku waxay ku salaysan tahay is ixtiraam iyo is ammin ka dhexeeya shaqaalaha isbitaalka.

Markaad isbitaalka ka baxaysid

Haddii shaqaalaha isbitaalku qiimeeyo, waxaa laga yaabaa in ay kuu soo jeediyaan in guriga lagugu caawiyo, markii aad ka baxdid isbitaalka.

Markii aad caafimaado ayaa dabcan isbitaalka lagaa saarayaa. Isbitaalka waxaa caado u ah in uu dhakhtarku wadahadal kula yeesho markii la gaaro xilligii guriga laguu diri lahaa. Shaqaalaha qaybta aad taallid ayaa kaa waanin doona waxa aad cuni kartid, daawada aad qaadaneysid iyo sidii aad caafimaadkaaga u ilaalin lahayd mustaqbalka dambe.

Haddii ay jiraan wax shaki kaaga jiro, waxaad kala xaajoon kartaa shaqaalaha isbitaalka.

Waxaa laga yaabaa in aad dhakhtarka ku ballantaan in aad baaritaan u soo noqotid. Halkaas uu dhakhtarku fiirin doono in aad caafimaaday iyo in kale.

Haddii shaqaalaha isbitaalku qiimeeyo in loo baahan yahay, waxaa laga yaabaa in ay kuu soo jeediyaan in kalkaaliyaha caafimaadku uu kugu soo siyaarto guriga. Hawlaha ay qabanayaan markii ay guriga kuugu yimaadaan waxaa ka mid ah ayaga oo kaa sifaynaya meeshee lagaa qalay kaana beddela duubitaanka. Waxay kaloo qiimaynayaan in loo baahan yahay kalkaaliyaha guriga iyo in kale, arrintaas oo ay kala xariirayaan xaafiiska bulshada ee degmada aad degen tahay, si ay go'aan uga gaaraan in caawiye laguu oggolaan karo iyo in kale. ■

Macluumaad guud ee kale

Inta aad isbitaalka taallid, waxaad ku jirtaa caymiska bukaha, Taas oo micnaheedu yahay in caymiskaasu gudayo waxii qaan ah, haddii isbitaalku dhibaato ku soo gaarsiiyo.

Haddaad rabtid in aad ka ashtakootid habka isbitaalka lagaaga daaweeyey, waxaad u dacwoon kartaa guddiga-bukaha.

Haddii aad wax su'aal ah ka qabtid arrimaha la xariira caymiska bukaha ama habka loo ashtakoodo, waxaad telefoon u diri kartaa qaybta isbitaalka ee loo yaqaan "Latalinta bukaha". Eeg telefoonada ku qeexan buuggaan galkiisa dambe.

Haddi dhibaato ku saabsan xagga deegaanka, dhaqaalaha ama waxii kaloo la mid ah ay kula soo gudboonaadaan inta aad isbitaalka taallid, shaqaalaha isbitaalka ayaa kula xariirinaya lataliyaha xagga bulshada ee degmada, sidii laguu caawin lahaa. Waxaa kaloo isbitaalku kaa caawin karaan in ay kuu qoraan warqad caddayn ah in isbitaalka lagu dhigay. ■

Reerkaaga/eheladaa

Inta aad isbitaalka taallid, waxaa ku soo booqan kara eheladaa iyo saaxiibadaa. Arrintaas kala xariir shaqaalaha isbitaalka, xilliyada dadka buka la soo booqan karo. Si adiga iyo dadka kale ee qolka kula yaallaba ay degganaan iyo xasillanaan u helaan, ayaa waxaa lagugu baraarujinayaa in aysan hal mar marti fara badan ku soo booqan – marba in yar ha kuu yimaadeen.

Isbitaalka waxaa laga heli karaa dukaan iyo makhaayad. ■

Umusha waxa la soo siyaaran karaa waqti go'an oo keliya, taasna waxaa looga danleeyahay in umusha iyo ilmuhu nastaan.

Uuraysiga iyo ummulidda

Haddii aad tuhmeysid in aad uuraysatay, waxaad la xariiri kartaa dhakhtarkaaga, kaas oo baaraya arrintaas oo tijaabo kaa qaadaya.

Haddii dhakhtarkaagu ogaado in aad uur yeelatay, wuxuu kaa qaadayaa tijaabo dhiig ah, markaas ka dib ayuu wuxuu warqadahaaga u gudbinayaa xarunta ummulisada iyo isbitaalka. Ummulisadu waxay cilmi dheer u leedahay arrimaha la xariira xaammilada iyo dhalidda. Ayadoo la tixgelinayo dhalitaankaaga, ayaa waxaa muhiim u ah ummulisada in ay ogaato in aad gudan tahay iyo in kale. Ummulisadu waxay ku siineysaa macluumaad ku saabsan ilmaha iyo adiga, sidii caafimaadkiinu ku hagaagi lahaa.

Waxaa kuu furan in aad guriga ku ummushid, in aad isbitaalka ku dhashid oo guriga aaddid saacaddo ka dib iyo in aad isbitaalka ku sii jirtid dhawr maalmood, markii aad ummushid ka dib.

Markii fool ku qabato, ayaad adigu ama ninkaagu la xiriireysaan isbitaalka qaybtiisa dhalidda. Halkaas oo aad kala ballamaysaan ummulisada isbitaalka waqtiga aad imaanaysaan. Sida caadiga ah idinka ayaa xallineysiin (xagga gaadiidka) sidii aad ku imaan lahaydeen isbitaalka.

Haddiise aad ku tala gashay in aad gurigaaga ku ummushid, waxaad la soo xariireysaa isbitaalka, si ay kuugu soo diraan ummuliso kuu timaadda.

Markki aad imaaneysid isbitaalka waxaad horay u soo qaadaneysaa kaarka diiwaan gelinta ee uuraysiga, alaabta xamaamka/suuliga, dhar fudud iyo kabo aad isbitaalka ku joogtid. Waa fikrad fiican in aad horay u soo qaadatid lacag yar oo qadaadiic/sarif ah, si aad ula xariirtid eheladaa markaad telefoon direysid.

Deenmaark waxaa caado u ah in aabbuhu goob joog noqdo markii xaaskiisu ummulayso, ninkuse xor buu u yahay arrintaas. Taasu waxay caawimaad fiican u tahay hooyada, ninkuna wuxuu kala kulmaa waayo aragnimo weyn.

Waxaa kuu furan in aad guriga ku ummushid, in aad isbitaalka ku dhashid oo aad guriga ku noqotid isla maalintaas ama in isbitaalka lagu dhigo markii aad ummushid.

Haddii aad wax su'aal ah ka qabtid arrintaas kor ku xusan waxaad la soo xariiraysaa ummulisada. Haddii loo baahdo qof mutarjum ah, waxaa kuu soo diyaarinaya qaybta dhalidda ee isbitaalka. Mutarjumku ma joogayo xilli aad dhalaysid oo dhan.

Waxaa caadi ah in ummushu muddo dhawr maalmood ah isbitaalka taallo, marka ay dhasho ka dib.
Haweenka qaar baan ku raagin isbitaalka, qaarna waxay doorbidaan in ay muddo ilmaha ku nuujiyaan qaybta dhalidda ee isbitaalka. Hase yeeshee, haddiise haweenta ilmaha lagu soo jeexay, waxay ku sii jirtaa isbitaalka muddo dheeraad ah.

Qaybta dhalidda ee isbitaalka waxaa la soo siyaaran karaa saacaddo go'an, taas oo muhiim ah in la ilaaliyo. Taas oo faa'iido u ah hooyada iyo ilmahaba.

Markii aad guriga timaadid, waxaa laguugu deeqayaa in ay ku soo siyaarato kalkaaliyaha caafimaadka ee guriga. Kalkaaliyaha caafimaadku wuxuu kaala talin doonaa arrimaha la xariira nuujinta, nafaqada iyo koritaanka ilmaha.

Jirrada cudur-maskaxeed

Haddii adiga ama qof eheladaa ahi, uu ku dhaco cudur-maskaxeed, waxaad saacad walba la xariiri kartiin qaybta gargaarka deg-degga ah ee isbitaalka cudur-maskaxeedka ee Hillerød

Isbitaalka cudur-maskaxeedka qaybtiisa gargaarka degdegga ah waxaa qofku ku jiri karaa muddo 3 maalmood ah, asaga oo aan isbitaalka si rasmi ah loo seexin. Dhakhtarka ayaa go'aan ka gaaraya in ay muhiim tahay in qofka isbitaalka la dhigo iyo in kale.

Isbitaalka waxaa lagu daaweyn karaa adiga oo aan lagu dhigin. Isbitaalka waxaad kala kulmi kartaa waxyaalo kala duwan, sida kalkaalinta xagga bulshda, jirka iyo firfircooni kala duwan.

Markii isbitaalka lagu dhigo, waxaad wadahadal la yeelaneysaa dhakhtar, kaas oo kaala hadlaya qorshaha lagula damacsan yahay, iyo sida daaweyntu u socon doonto.

Inta aad isbitaalka taallid waxaad la kulmi doontaa shaqaale kale duwan oo ka kooban rag iyo dumarba. Shaqaalaha isbitaalku wuxuu noqon karaa dhakhtaro, kalkaaliyaha caafimaadka, gacan-yareyaal, lataliyaha xagga bulshada, seykoloojiiste (qof yaqaan cilmi-nafsiga) iyo dabiib (terapeuter). Shaqaalaha isbitaalku midba qayb gooni ah ayuu khabiir ku yahay. Waxaad kaloo isbitaalka kala kulmi kartaa arday kala duwan.

Shaqaalaha isbitaalku ma xirna yunifoom (dhar u gaar ah). Waxay labisan yihiin dhar caadi ah. Hase yeeshee, markii isbitaalka lagu dhigo ayaa lagu barayaa shaqaalaha kala duwan ee qaybta lagu dhigay.

Inta badan qolka lagu dhigay waxaa waxaa loogu tala galay qof ama labo qof.

Dadka isbitaaladaan la dhigo, ayaga ayaa iskood u codsada in la dhigo, hase yeeshee, waxaa jira dad yar oo si qasab ah loo dhigo isbitaalka. Marka si qasab ah qof isbitaalka lagu dhigayo, waxaa jira sharci la raaco. Sharcigaas waxaa ka mid ah in dhakhtarkaaga, eheladaa iyo booliisku ay ka wadahadlaan dhigitaankaaga. Qaybta isbitaalka lagaa dhigay, waxaad ka heli kartaa buuggaag yaryar oo ka hadlaya arrintaas iyo xuquuqda aad leedahay.

Waxaa kuu furan in aad ka ashtakootid/dacwootid, haddii qasab isbitaalka laguu dhigay ama si aadan raalli ka ahayn laguu daaweeyey.

Sundhedsvæsenet
FREDERIKSBORG AMT

Esbønderup Sygehus
Sygehusvej 4
3230 Græsted
Tlf. 48 29 48 29

Psykiatrisk Sygehus
Dyrehavevej 48
3400 Hillerød
Tlf. 48 29 48 29

Hillerød Sygehus
Helsevej 2
3400 Hillerød
Tlf. 48 29 48 29

Frederikssund Sygehus
Frederikssundsvej 30
3600 Frederikssund
Tlf. 48 29 50 00

Helsingør Sygehus
Esrumvej 145
3000 Helsingør
Tlf. 48 29 49 49

Hørsholm Sygehus
Usserød Kongevej 102
2970 Hørsholm
Tlf. 48 29 29 29



Xaafiiska talabixinta bukaha ee gobolka Frederiksborg

Xaafiiska talabixinta bukaha ee isbitaalka Frederikssund
Maalmaha caadiga ah: 10 - 13
4829 5000
(Weydii xaafiiska latalinta bukaha)

Xaafiiska talabixinta bukaha ee isbitaalka Helsingør iyo Hørsholm
Maalmaha caadiga ah: 10 - 13
4829 2289

Xaafiiska talabixinta bukaha ee isbitaalka Hillerød iyo isbitaalka cudur-madaxeed
Maalmaha caadiga ah: 10 - 13
4829 3024

Xaafiiska talabixinta bukaha ee hey'ada caafimaadka Qaybta maamulka
Isniinta - khamiista: 9 - 16, maalinta jimcaha: 9 - 13

Buugaan yar waxaa loo soo saaray guddiga-sinaanta, waxaana soo qorsheeyey guddiga warbixinta ajaanibka ee gobolka Århus.

Tekst og layout: Børge Guldbrandt, Journalistkontoret, Århus Amt. Fotos: Hanne Minke, Kresten Scheel og Anders Rasmussen. Layout, sats og tryk: Århus Amts Trykkeri, DS/EN ISO 14001 miljøcertificeret og EMAS-registreret, 106-01-057